

Ilko-cadayashadu Waxay Samaysaa Kala Duwanaansho Marka loo eego ECEAP

Early Childhood Education and Assistance Program (Waxbarashada Barbaarinta Caruurta iyo Barnaamijka Caawinta, ECEAP) waxa ka go'an muhiimada ay leedahay in ilko-cadayashada lagu bilaabo da'da hore. Caruurnimada hore waa wakhtiga ugu muhiimsan ee cuntada la bilaabo, caddooyinka muddada dheer jira. Carruurta da'da yar waxay u nugul yihiin samaysashada daloolka. Cadayashada joogtada ahi waxay ka caawisaa inay meesha ka saarto suuska oo ay ka hortagto ilko jababka, taasoo ka caawinaysa in ilkhoodu noqdaan mid adag, iyadoo sidoo kale wanaajinaysa koboca murqaha shaqada qabanaya. Af caafimaad qabaa waxa uu ka qeybqaadanayaa guud ahaan caafimaadka jidhka, kordhinta kalsoonida, oo waxay u ogolaanaysaa caruurta inay diirada saaraan waxbarashadooda. Marka lagu daro cadayga hawl maalmeedkooda, waxaanu awood u siinaynaa dhallaankeena inay ilaashadaan nadaafadda wanaagsan ee afka inta ay nool yihiin oo dhan.



Cadayashada inta lagu jiro ECEAP

- Nidaamka macalimintu wuxuu saxayaa ilko cadayashada iyadoo loo marayo hawlaha lasoo bandhigayo.
- Ilko-cadayashadu waa koox hawlo ah, waxay samaynaysaa dareen aan kaliya keenayn inay ku raaxaystaan in badan laakiin sidoo kale dhiirigalinaysa waxbarashada caruurta ay isku faca yihiin.
- Macalimiintu waxay hubin karaan in caruurta ay wakhti ku filan ku qaadanayaan dhammaan goobaha iyagoo tirinaya ama ku heesaya hees.



Shuruudaha Baadhista Ilkaha ee ECEAP

95% carruurta ECEAP waxay heleen baadhitaanno ilkeed ama baadhitaanno iyo daryeel dabagal ah.




Hawlaha Qoyska

- Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay kordhiyaan caadooyinka cadayga ee guriga.
- Shaqaalaha ECEAP waxay siiyaan qoysaska agab waxbarasho iyo khayraad kale, si ay u fahmaan muhiimada ay leedahay nadaafadda afka iyo saamaynta ay ku leedahay diyaargarowga dugsiga barbaarinta.
- Waalidiinta waxaa la siiyaa taageerada iyo caawinta ay u baahan yihiin si ay ula socdaan baadhitaannada iyo daaweynta.

2022-23 ECEAP Natiijooyinka Caafimaad

n=15,514 Carruurta La Diwaangeliyey 120
Maalmood ama Ka Badan



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Waxb ka Badalista Cadayashada inta lagu jiro Fasalka ECEAP

ECEAP waxay aaminsantahay ka mid noqoshada iyo hubinta in ilmo kasta uu helo daryeelka uu u qalmo. Cadayashada ECEAP waxaa loogu talagalay inay u noqoto waayo-aragnimo uu ku raaxaysto ilmo kasta, iyada oo aan loo eegin awoodaha. Waxaa jira siyaabo badan oo wax looga beddelo cadayga maalinlaha ah ee goobta dugsiga barbaarinta iyo guriga si loo hubiyo khibrad waxbarasho oo u wanaagsan dhammaan carruurta.



Qalabyada Lala Qabsado:

Baadh burushyada cadayga leh sidayaasha kala duwan leh, cabbirro iyo qaabab kala duwan. Aaladaha la qabsiga ayaa ka dhigi kara cadayashada mid ay aad ugu raaxaysataan carruurta leh caqabado xagga dhaqdhaqaaqa.



Caawimooyinka Muuqaalka:

Isticmaal jadwal muuqaal ah, sheekooyin bulsheed, ama wakhti-muuqaal si aad u abuurto nidaam la saadaalin karo. Tani waxay ka caawisaa carruurta qaba ootiisamka ama dhibaatooyinka habaynta dareenka kale inay fahmaan oo ay u diyaar garoobaan hawsha cadayga.



Daawada ilkaha ee dareenka-Saaxiibtinimo:

Dooro daawada cadayga oo leh dhadhan khafiif ah iyo muuqaal. U oggolow carruurta inay sahamiyaan oo ay doortaan daawada cadayga si ay khibraddu uga dhigto mid soo jiidasho leh.



Meelaynta Arrimaha:

Tixgali kuraas kala duwan iyo boosas si ay u helaan caruurta leh baahiyaha naafanimoo ee kala duwan. Hubi helitaanka iyo raaxada inta lagu jiro wakhtiga cadayga.



Muusiga iyo Wakhti Hayaasha:

Isticmaal muusig madadaalo iyo dejin leh inta lagu jiro cadayga. Wakhti Hayaasha leh tilmaamo muuqaal ama maqal ayaa ka caawin kara carruurta inay fahmaan muddada hawsha.